

## Goobaha aad ka heleeyso talooyin

### FEM Süd

Frauengesundheitszentrum im

Kaiser Franz Josef Spital Wien

Kundratstraße 3, 1100 Wien

Tel: 01/601 91- 5212 oder 5201

e-mail: [femsued.post@wienkav.at](mailto:femsued.post@wienkav.at)

web: [www.fem.at](http://www.fem.at)

### Bright Future

Beratungsstelle für Frauengesundheit und FGM

Schwarzspanierstraße 15/1, Tür 2, 1090 Wien

Tel: 01/319 26 93

e-mail: [afrikanisc.frauenorganisation@chello.at](mailto:afrikanisc.frauenorganisation@chello.at)

web: [www.african-women.org](http://www.african-women.org)

### Orient Express - Frauenberatungsstelle

Hillerstraße 6, 1020 Wien

Tel: 01/728 97 25

e-mail: [office@orientexpress-wien.com](mailto:office@orientexpress-wien.com)

web: [www.orientexpress-wien.com](http://www.orientexpress-wien.com)

### Kinder- und Jugendanwaltschaften

und Frauengesundheitszentren der Bundesländer.

### KooperationspartnerInnen:




 RennerInstitut

 Die Kinderfreunde

 SONNE

Impressum: MedieninhaberIn, HerausgeberIn und für den Inhalt verantwortlich:  
Österreichische Plattform gegen weibliche Genitalverstümmelung, Parlament,  
1017 Wien, [www.stopfgm.net](http://www.stopfgm.net), Layout: Lisa Fuchs, Druck: Friedrich VDV.



# FGM

Faraxumaynta  
cambarka gabdaha



[www.stopfgm.net](http://www.stopfgm.net)

Urur Austrian ah oo la dagaalama  
faraxumaynta cambarka gabdaha

**FGM** burburinta canbarka gabdhaha waxaa loola jeedaa burburinta cambarka gabdhaha iyo naagaha waana caado soo jireen ah oo ay la kulmaan 160 Malyan oo gabdhood

FGM waxaa looga dhaqmaa meelo badan oo ku kal yaala Afrika iyo Aasiya. Waxaana laga aamin yahay in gabar aanan gudnayn ay tahay mid aanan daahir ahayn aana guur u qalmin. Marka la iska dhaafo wararka kutirikuteenka ah ma jirto diin sheegaysa in gabdhaha la gudo. Dadka wacdiyana waxay mar kasta sheegaan inaysan diintu sidaas qabin.

Sanadihii ugu danbeeyey waxaa bilaabatay dood looga hadlaayo qasaaraha uu gudniinka geesto. Qoysas iyo ururo iyo wadamo badan ayaa go'aan saday inay gabdhahooda si caafi-maad leh u koriyaan ayna mar danbe aysan gudin.

Aan si wada jira uga ilaalino gabdhaheena dhibka iyo xanuunka, si ay nolol caafimaad ku dheehan u helaan.

### **Sharciga Austria waxuu gudniinka ka qabo**

- Jarjaridda gabdhaha canbarkooda waa gaf wayn oo loo geesto gabadha jirkeeda waxaana qofkii sidaas sameeya lagu xukumayaa 10 sanoo oo xarig ah xataa haddii ay gabadha raali ka tahay gudniinka
- Gudniinka haddii xataa dibadda lagu soo sameeyo waa danbi
- Xuquuqda waxay bilaabanaysaa marka dhibka loo geestay qaana gaaro
- Waxaa la xukumayaa qofka gudniinka geestay iyo kann ku caawiyey

### **Dhibaatooyinka ka imaan kara FGM**

Jarjarida canbarka waxuu dhib wayn u geeysan karaa caafi-maadka gabadha. Waxaana marar badan dhacda in gabadha ku dhaco infakshan iyo barar kuwaasoo qatar galin kara nollosha gabadha dhiigana uu sumoobo

Gabdhaha la guday noloshooda inta ka dhiman wa-xaa mar kasta qabanaaya xanuun markarka ay kaa-dinaayaan, uu dhiiga ku dhaco. Galmada waxay ku haysaa xanuun badan umana suurto galayso inay galmo caadi ah oo ay ku raaxaysato hesho. Haddii uu qofkasa la guday dhalo waxaa mar kasta dhalmada ay u keentaa dhibaatooyin badan kuwaa-soo keeni kara inay hooyada iyo caruurtaaba dhin-taan.

FGM waxuu keenaa dhib maskaxiyah ah kaasoo keeni kara in uu qofka madaxa ka xoog wareero

FGM waa qatar aad u wayn naagaha jirkooda iyo dareekooda loo geeyto

